Bortooyada Sacuudi Caraabiya
Wasaarada Tacliinta Sare
Jaamacada islaamiga ee Madiina
Maamulka u Adeegga Bulshada.
Waaxda Wacyigalinta Jaaliyadaha

# SADDEXDA ASAL IYO DALIILAHOODA

## WAXAA ALIFAY: SHEEKH MAXAMED BIN CABDULWAHAAB

AF-SOOMAALI

المملكة العربية السعودية
وزارة التعليم العالي
الجامعة الإسلامية بالمدينة المنورة
عمادة البحث العلمي

قسم الترجمة

# الأصول الثلاثة وأدلتها

تأليف / الإمام العلامة الشيخ

محمد بن عبد الوهاب

( رحمه الله )

باللغة

الصومالية

بسم الله الرحمن الرحيم

Ogow Alle hakuu naxariistee in ay korkeenna ku waajibayso in aan baranno afar arrimood:

1. Cilmiga, oo ah barashada Alle, barashada Nabigiisa, iyo barashada diinta islaamka iyo adiladeeda.
2. Cilmigaas aan barannay in aan ku camal falno.
3. Iyo in aad dadka ugu yeerto.
4. Iyo in lagu sabro dhibka kaa soo gaaraya.

waxaa daliil u ah hadalka Alle:

﴿ بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ وَٱلْعَصْرِ ۝١ إِنَّ ٱلْإِنسَٰنَ لَفِى خُسْرٍ ۝٢ إِلَّا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟ ٱلصَّٰلِحَٰتِ وَتَوَاصَوْا۟ بِٱلْحَقِّ وَتَوَاصَوْا۟ بِٱلصَّبْرِ ۝٣ ﴾ [سورة العصر]

oo uu macnihiisu yahay: {waxaan ku bilaabayaa magaca Alle, Allihii naxariista guud iyo gaar ahba naxariista, Casarka ayaan ku dhaartay, dadkii qasaaro ayay ku jiraan, kuwii Alle rumeeyay mooyee, oo haddana camal wanaagsan sameeyay, xaqana isku dardaarmay, sabarkana isku dardaarmay}.

Imaam Shaafici wuxuu yiri: haddii uusan Alle ku soo dejin lahayn khalqigiisa xujo aan suuraddan ahayn way ku fillaan lahayd. Bukhaari wuxuu yiri: (kan wuxuu u baab yahay in Cilmigu ka horreeyo hadalka iyo samaynta camalka), waxaana daliil u ah hadalka Alle:

﴿فَٱعْلَمْ أَنَّهُۥ لَآ إِلَٰهَ إِلَّا ٱللَّهُ وَٱسْتَغْفِرْ لِذَنۢبِكَ وَلِلْمُؤْمِنِينَ وَٱلْمُؤْمِنَٰتِ ۗ وَٱللَّهُ يَعْلَمُ مُتَقَلَّبَكُمْ وَمَثْوَىٰكُمْ ﴿١٩﴾﴾ [سورة محمد]

oo uu macnahiisu yahay: {ogow in Alle xaq lagu caabudo uusan jirin Alle maahee, dambi dhaafna waydiiso}. Wuxuu Alle ku billaabay aayadda cilmiga, hadalka iyo camalka kahor.

Ogow Alle ha kuu naxariistee in nin kasta iyo haweeney kasta oo muslin ah ay waajib ku tahay in ay saddex arrimood bartaan, kuna camalfalaan saddexdaas arrimood waa:

1. Alle in uu na abuuray, oo uu na arsuqay, uussana Alle sidaas nooga tagin ee wuxuu noo soo diray Rasuul, qofkii aan raacin Rasuulkaas naarta ayuu galayaa, waxaana taas daliil u ah hadalka Alle:

﴿ إِنَّآ أَرۡسَلۡنَآ إِلَيۡكُمۡ رَسُولٗا شَٰهِدًا عَلَيۡكُمۡ كَمَآ أَرۡسَلۡنَآ إِلَىٰ فِرۡعَوۡنَ رَسُولٗا ١٥ فَعَصَىٰ فِرۡعَوۡنُ ٱلرَّسُولَ فَأَخَذۡنَٰهُ أَخۡذٗا وَبِيلٗا ١٦ ﴾ [سورة المزمل]

oo uu macnahiisu yahay: {waxaan idiin soo dirnay Rasuul idinku marqaati furaayo sidii aan ugu soo dirnay Fircoon Rasuul, Fircoon wuu caasiyay Rasuulkii, waana qabannay Fircoon qabasho adag oo aad u daran}.

2. Alle raalli kama aha in qof kale lala caabudo, ha noqdo qofkaas lala caabudayo malak dhaw ama nabi la soo diray, waxaana daliil u ah hadalka Alle:-

﴿ وَأَنَّ ٱلۡمَسَٰجِدَ لِلَّهِ فَلَا تَدۡعُواْ مَعَ ٱللَّهِ أَحَدٗا ١٨ ﴾ [سورة الجن]

oo uu macnahiisu yahay: {Masaajidda Alle ayaa iska leh ee Alle la jirkiisa wax kale ha ku caabudina}.

3. Qofkii rasuulka raaca, Allana kali yeela uma bannaana in uu xiriiriyo qof Alle iyo rasuulkiisa gooyay oo la dagaalamay, haddii uu rabo qofkaas ha ahaado qofka

kuugu dhaw qaraabo ahaan. Waxaana daliil u ah hadalka Alle:

﴿ لَّا تَجِدُ قَوْمًا يُؤْمِنُونَ بِٱللَّهِ وَٱلْيَوْمِ ٱلْءَاخِرِ يُوَآدُّونَ مَنْ حَآدَّ ٱللَّهَ وَرَسُولَهُۥ وَلَوْ كَانُوٓا۟ ءَابَآءَهُمْ أَوْ أَبْنَآءَهُمْ أَوْ إِخْوَٰنَهُمْ أَوْ عَشِيرَتَهُمْ ۚ أُو۟لَٰٓئِكَ كَتَبَ فِى قُلُوبِهِمُ ٱلْإِيمَٰنَ وَأَيَّدَهُم بِرُوحٍ مِّنْهُ ۖ وَيُدْخِلُهُمْ جَنَّٰتٍ تَجْرِى مِن تَحْتِهَا ٱلْأَنْهَٰرُ خَٰلِدِينَ فِيهَا ۚ رَضِىَ ٱللَّهُ عَنْهُمْ وَرَضُوا۟ عَنْهُ ۚ أُو۟لَٰٓئِكَ حِزْبُ ٱللَّهِ ۚ أَلَآ إِنَّ حِزْبَ ٱللَّهِ هُمُ ٱلْمُفْلِحُونَ ﴿٢٢﴾ ﴾ [سورة المجادلة]

oo uu macnahiisu yahay: {ma helaysid dad rumeeyay Alle iyo maalinta qiyaamaha haddana jecel Qof Alle iyo rasuulkiisa gooyay, haba ahaadaan kuwaas Alle iyo rasuulkiisa gooyay aabbayaalkooda ama carruurtooda ama walaalahooda ama qaraabadooda, kuwaas aan jeclaanaynin dadka Alle gooyay wuxuu Alle ku qorey qalbiyaalkooda Iimaan, Allana wuxuu ku xoojiyay xujo, nuur iyo hanuun oo iimaanka xaggiisa ka timid, Alle wuxuu galiyaa kuwaas jannooyin ay hoostooda dareeraayaan wabiyaal, ayaga oo ku waaraya jannooyinkaas, kuwaas Alle waa ka raalli noqday, ayagana way ka raalli

noqdeen Rabbigood, kuwaasi waa xisbiga Alle, Xisbiga Alle asaga ayuun baa liibaanaaya}.

Ogow Alle ha kugu hanuuniyo daacadiisee "cibaadadiisa" Diinta Xaniifiyada nabi Ibraahiim waa in aad Alle kaligii caabuddo, adigoo diinta u kali yeelaya oo aan wax kale la wadaajinaynin, sidaas ayaana Alle faray dadka oo dhan una abuuray sida uu Alle yir:

﴿ وَمَا خَلَقْتُ ٱلْجِنَّ وَٱلْإِنسَ إِلَّا لِيَعْبُدُونِ ﴿٥٦﴾ ﴾[ســــــــورة الذاريات]

oo uu macnaheedu yahay: {uma aannan abuurin Jinniga iyo Insaanka inay i caabudaan mooyee}, macnaha i caabudaan waa i kali yeelaan. Waxa ugu wayn ee uu Alle faray waa Towxiidka, waana in Alle loo kali yeelo cibaadadiisa, waxa ugu wayn ee uu Alle reebayna waa Shirkiga waana in aad Alle “cibaadadiisa” wax la wadaajiso, waxaana daliil u ah hadalka Alle:

﴿ وَٱعْبُدُواْ ٱللَّهَ وَلَا تُشْرِكُواْ بِهِۦ شَيْـًٔا ۖ ﴿٣٦﴾ ﴾ [سورة النساء]

oo uu macnahiisu yahay: {Alle caabuda waxna hala wadaajinnina}.

Haddii lagugu yiraahdo maxay tahay saddaxda asal ee waajibka ku ah in uu Insaanku barto?

Waxaa tiraahdaa: waa in uu barto Rabigiisa, Diintiisa, iyo Nabigiisa Maxamed ﷺ.

Haddii lagugu yiraahddo ka aad caabuddaa waa kuma? Waxaad tiraahdaa waa Rabbigayga rabbigaasoo aniga igu barbaariyay, kuna barbaariyay dadka oo dhan nicmadiisa, waana Allihii aan caabudayay, iimana sugnaan Alle aan asaga ahayn, waxaana daliil u ah hadalka Alle:

﴿ ٱلۡحَمۡدُ لِلَّهِ رَبِّ ٱلۡعَٰلَمِينَ ٢ ﴾ [سورة الفاتحة]

oo uu macnahiisu yahay {waxaa mahad oo dhan ay u sugnaatay Alle, Allahaasoo makhluuqaadka Rabbigooda ah}, wax kasta oo Alle ka soo hara oo dhan waa caalam, anigana caalamkaas ayaan qeyb ka ahay.

Haddii lagugu yiraahdo: maxaad Rabbigaaga ku garatay? Waxaad tiraahdaa: waxaan ku gartay calaamooyinkiisa iyo makhluuqaadkiisa, calaamadaha tusinayana waxaa ka mid ah: habeenka, maalinta, qorraxda iyo dayaxa, makhluuqaadkiisana waxaa ka mid ah: toddobada cir iyo toddobada dhul iyo waxa ku dhex jira iyo inta u dhaxaysa, waxaana daliil u ah hadalka Alle:

﴿ وَمِنْ ءَايَٰتِهِ ٱلَّيْلُ وَٱلنَّهَارُ وَٱلشَّمْسُ وَٱلْقَمَرُ ۚ لَا تَسْجُدُوا۟
لِلشَّمْسِ وَلَا لِلْقَمَرِ وَٱسْجُدُوا۟ لِلَّهِ ٱلَّذِى خَلَقَهُنَّ إِن كُنتُمْ إِيَّاهُ
تَعْبُدُونَ ﴿٣٧﴾ ﴾[سورة فصلت]

oo uu macnahiisu yahay: {Calaamadaha Alle waxaa ka mid ah habeenka, maalinta, qorraxda iyo dayaxa, ee ha u sujuudina  qoraxda iyo dayaxa ee u sujuuda Allihii ayaga abuuray, haddii aad tihiin kuwo Alle caabudaya} iyo hadalka Alle:

﴿ إِنَّ رَبَّكُمُ ٱللَّهُ ٱلَّذِى خَلَقَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضَ فِى سِتَّةِ أَيَّامٍ ثُمَّ
ٱسْتَوَىٰ عَلَى ٱلْعَرْشِ يُغْشِى ٱلَّيْلَ ٱلنَّهَارَ يَطْلُبُهُۥ حَثِيثًا
وَٱلشَّمْسَ وَٱلْقَمَرَ وَٱلنُّجُومَ مُسَخَّرَٰتٍۭ بِأَمْرِهِۦٓ ۗ أَلَا لَهُ ٱلْخَلْقُ وَٱلْأَمْرُ
تَبَارَكَ ٱللَّهُ رَبُّ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿٥٤﴾ ﴾

[سورة الأعراف]

oo uu macnahiisu yahay: {Rabbigiinna waa Allihii ku abuuray cirarka iyo dhulka lix maalmood gudahooda, kadibna carshiguu ka sara maray, wuxuu galiyaa habeenkii maalintii, habeenku wuxuu dalbayaa maalintii si degdeg ah, wuxuu kaloo abuuray qorraxdii dayaxii iyo

xiddigihii ayadoo amarka Alle lagu fududeeyay, Alle waxaa u sugnaaday oo uu leeyahay abuuritaanka iyo amarka, Alle ayaa waynaaday oo makhluuqaadka oo dhan Rabigooda ahaa}.

Rabbiguna waa kii la caabudayay, waxaana daliil u ah hadalka Alle:

﴿ يَـٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ ٱعۡبُدُواْ رَبَّكُمُ ٱلَّذِي خَلَقَكُمۡ وَٱلَّذِينَ مِن قَبۡلِكُمۡ لَعَلَّكُمۡ تَتَّقُونَ ٢١ ٱلَّذِي جَعَلَ لَكُمُ ٱلۡأَرۡضَ فِرَٰشٗا وَٱلسَّمَآءَ بِنَآءٗ وَأَنزَلَ مِنَ ٱلسَّمَآءِ مَآءٗ فَأَخۡرَجَ بِهِۦ مِنَ ٱلثَّمَرَٰتِ رِزۡقٗا لَّكُمۡۖ فَلَا تَجۡعَلُواْ لِلَّهِ أَندَادٗا وَأَنتُمۡ تَعۡلَمُونَ ٢٢ ﴾[سورة البقرة]

oo uu macnahiisu yahay: {dadoow Rabbigiinna caabuda Allihii idin abuuray kuwii idinka horeeyayna abuuray, waxaad mudan tihiin inaad cabsataan. Allihii idinkaga dhigay dhulka gogol, cirkana ka yeelay dabool, kana soo dajiyay cirka biyo, biyahana ku soo dhaliyay miro qaarkood arsuqaad idinka la idin arsuqayo, ha u yeelinina Alle kuwo la siman adinkoo og}, Ibnu Kasiir wuxuu yiri: Abuuraha abuuray waxyaabaha la sheegay ayaa mudan cibaadada.

Noocyada cibaadada ee uu Alle amray sida Islaamka, Iimaanka iyo Ixsaanka, waxaa ka mid ah: Baryada, Cabsida, Rajaynta,

Talosaarashada, Doonista, Cabsida, Khushuuca, Alle ka baqid, Alle u noqosho, Kaalmowaydiisasho, Magangalka, Gargaar waydiisashada, Gowraca, Nadarka iyo Cibaadooyinka kale ee uu Alle amray, dhammaantood Alle ayay u sugnaadeen oo iska leh, waxaana daliil u ah hadalka Alle:

﴿ وَأَنَّ ٱلۡمَسَٰجِدَ لِلَّهِ فَلَا تَدۡعُواْ مَعَ ٱللَّهِ أَحَدٗا ١٨ ﴾ [سورة الجن]

oo uu macnahiisu yahay: {masaajidyada Alle ayaa iska leh ee ha la caabudina Alle qof kale}. Qofkii u leexiya cibaadooyiinkaas qof aan Alle ahayn waa Mushrik gaal ah, waxaana daliil u ah hadalka Alle:

﴿ وَمَن يَدۡعُ مَعَ ٱللَّهِ إِلَٰهًا ءَاخَرَ لَا بُرۡهَٰنَ لَهُۥ بِهِۦ فَإِنَّمَا حِسَابُهُۥ عِندَ رَبِّهِۦٓۚ إِنَّهُۥ لَا يُفۡلِحُ ٱلۡكَٰفِرُونَ ١١٧ ﴾

[سورة المؤمنون ]

oo uu macnihiisu yahay {qofkii la barya Alle macbuud kale oo uuna xujo u haysanin, qofkaas xisaabtiisa rabbigiisa xagiisa ayay ahaatay, gaaladuna ma liibaanto} xadiiska waxaa ku jiray:

(الدعاء مخ العبادة)[1]

(ducadu waa dhuuxa cibaadada), waxaa daliil u ah hadalka Alle:

﴿ وَقَالَ رَبُّكُمُ ٱدۡعُونِيٓ أَسۡتَجِبۡ لَكُمۡۚ إِنَّ ٱلَّذِينَ يَسۡتَكۡبِرُونَ عَنۡ عِبَادَتِي سَيَدۡخُلُونَ جَهَنَّمَ دَاخِرِينَ ٦٠ ﴾ [سورة غافر]

oo uu macnahiisu yahay: {rabbiggiinna wuxuu yiri aniga i barya aan idinka ajiibee, kuwa ducadeyda iska waynaysiiya waxay gali doonaan naarta jahanamo iyagoo dullaysan}, cabsida waxaa daliil u ah hadalka Alle:

﴿...فَلَا تَخَافُوهُمۡ وَخَافُونِ إِن كُنتُم مُّؤۡمِنِينَ ١٧٥ ﴾[آل عمران]

oo uu macnihiisu yahay {haka cabsannina ee aniga iga cabsada haddii aad tihiin muuminiin}, Rajada waxaa daliil u ah hadalka Alle:

﴿ فَمَن كَانَ يَرۡجُواْ لِقَآءَ رَبِّهِۦ فَلۡيَعۡمَلۡ عَمَلٗا صَٰلِحٗا وَلَا يُشۡرِكۡ بِعِبَادَةِ رَبِّهِۦٓ أَحَدَۢا ١١٠ ﴾[سورة الكهف]

Oo uu macnahiisu yahay: {Qofkii rajaynaya inuu Allihiis la kulmo ha sameeyo camal fiican,

[1] Waxaa ka sugnaaday rasuulka ﷺ inuu yiri: “ducada iyada ayaa cibaadada ah”

yuusana la wadaajin cibaadada Alle qof kale}. Talosaarashada waxaa daliil u ah hadalka Alle:

﴿ وَعَلَى ٱللَّهِ فَتَوَكَّلُوٓاْ إِن كُنتُم مُّؤْمِنِينَ ٢٣ ﴾

[سورة المائدة]

oo uu macnihiisu yahay: {Alle talosaarta haddii aad tihiin muuminiin}, iyo hadalka Alle :

﴿ وَمَن يَتَوَكَّلْ عَلَى ٱللَّهِ فَهُوَ حَسْبُهُۥٓ ﴾[سورة الطلاق ٣]

oo uu micnihiisu yahay: {Qofkii Alle talosaarta asaga unbaa ku filan}. Doonista, Cabsida iyo khushuuca waxaa daliil u ah hadalka Alle:

﴿ ...إِنَّهُمْ كَانُواْ يُسَٰرِعُونَ فِى ٱلْخَيْرَٰتِ وَيَدْعُونَنَا رَغَبًا وَرَهَبًا ۖ وَكَانُواْ لَنَا خَٰشِعِينَ ٩٠ ﴾

[سورة الأنبياء]

oo uu micnihiisu yahay : {waxay ahaayeen kuwo u degdega khayraadka oo na barya iyagoo rajaynaya cabsanayana waxayna ahaayeen kuwo noo khushuuca}. Alle ka cabsashada waxaa daliil u ah hadalka Alle:

﴿ ...فَلَا تَخْشَوْهُمْ وَٱخْشَوْنِى ١١١ ﴾[سورة البقرة ١٥٠]

oo uu micnihiisu yahay: {haka cabsannina ee aniga iga cabsada}.

Alle u noqoshada waxaa daliil u ah hadalka Alle:

﴿ ...وَأَنِيبُوٓاْ إِلَىٰ رَبِّكُمۡ وَأَسۡلِمُواْ لَهُۥ ﴾[سورة الزمر ٥٤]

oo uu manihiisu yahay: {Allihiinna u noqda una hoggaansama}.

Kaalmo waydiisashada waxaa daliil u ah hadalka Alle:

﴿ إِيَّاكَ نَعۡبُدُ وَإِيَّاكَ نَسۡتَعِينُ ۝٥ ﴾[سورة الفاتحة]

oo uu macnihiisu yahay: {Allow adiga kali ah ayaan ku caabudaynaa adiga kaligaa ayaan kaalmo waydiisanaynaa}, xadiiska waxaa ku jiray :

(إذا استعنت فاستعن بالله )

(haddii aad kaalmo waydiisanaysid Alle kaalmo waydiiso).

Magangalka waxaa daliil u ah hadalka Alle:

﴿ قُلۡ أَعُوذُ بِرَبِّ ٱلنَّاسِ ۝١ مَلِكِ ٱلنَّاسِ ۝٢ ﴾[ سورة الناس]

oo uu micnihiisu yahay {waxaad tiraahdaa waxaan magangalayaa rabbiga dadka, ee boqorka dadka ah}. Gargaarwaydiisashada waxaa daliil u ah hadalka Alle uu yiri:

﴿ إِذۡ تَسۡتَغِيثُونَ رَبَّكُمۡ فَٱسۡتَجَابَ لَكُمۡ ﴾ [سورة الأنفال ٩]

oo uu macnihiisu yahay: {xusuusta markaad gargaar waydiisanayseen Alle ee uu idinka ajiibay}.

Gowricidda waxaa daliil u ah hadalka Alle:

﴿ قُلْ إِنَّ صَلَاتِي وَنُسُكِي وَمَحْيَايَ وَمَمَاتِي لِلَّهِ رَبِّ ٱلْعَٰلَمِينَ ۝١٦٢ لَا شَرِيكَ لَهُۥۖ وَبِذَٰلِكَ أُمِرْتُ وَأَنَا۠ أَوَّلُ ٱلْمُسْلِمِينَ ﴾ [سورة الأنعام]

oo uu macnihiisu yahay: {waxaad tiraahdaa salaaddayada, gowracayga, noolayntayda iyo dhimashadeydа Alle ayaa iska leh, caalamka rabbigiisa ahaa, wax la wadaagana ma jiro, sidaasaana la i faray anigaana ugu horreeya muslimiinta}, sunnada xaggeedana waxaa daliil u ah :

( لعن الله من ذبح لغير الله )

{Alle ha lacnado qofka Alle waxaan ahayn wax u gowraca}.

Nadarkana waxaa daliil u ah hadalka Alle:

﴿ يُوفُونَ بِٱلنَّذْرِ وَيَخَافُونَ يَوْمًا كَانَ شَرُّهُۥ مُسْتَطِيرًا ۝٧ ﴾

[سورة الإنسان]

oo macnaheedu yahay: {waxay oofiyaan nadarka waxayna ka cabsadaan maalin ay shartiisu faafayso}.

## ***ASALKA LABAAD***

Barashada diinta Islaamka oo daliillo lagu barto. Islaamka micnihiisuna waa in Alle la iskugu dhiibo kaliyayntiisa looguna hoggaansamo warkayeelid, lagana beri noqdo shirkiga iyo dadkiisa, waana saddex Darajood: Islaamka, Iimaanka iyo Ixsaanka, martabad kastana waxay leedahay tiirar.

***Darajada Koowaad*: *Islaamka*:**

Tiirarka Islaamka waa shan:

1. Inaad rumeyso ku xaq lagu caabudo inuusan jirin Alle mooyee, Maxamedna ﷺ uu rasuulka Alle yahay.
2. Salaadda inaad oogto ood tukato.
3. Zakadiina aad bixiso.

4. Bisha ramadaanna aad soonto.
5. Xajkiina aad aaddo.

In aad qirto ku xaq lagu caabudo inuusan jirin Alle mooyee iyo inuu Maxamed ﷺ Rasuulka Alle yahay, rumaynta Alle la rumeeyo waxaa daliil u ah hadalka Alle:

﴿ شَهِدَ ٱللَّهُ أَنَّهُۥ لَآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ وَٱلۡمَلَٰٓئِكَةُ وَأُوْلُواْ ٱلۡعِلۡمِ قَآئِمَۢا بِٱلۡقِسۡطِۚ لَآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ ٱلۡعَزِيزُ ٱلۡحَكِيمُ ١٨ ﴾ [سورة آل عمران]

oo uu macnihiisu yahay: {Alle wuxuu qirayaa in ku xaq lagu caabudo uusan jirin Alle mooyee Malaa'ikta iyo dadka Cilmiga lehna way qirayaan, Alle asagoo cadaalad ku taagan, ku xaq lagu caabudo majiro Alle maahee, waana adkaade falsan} Aayadda macnaheedu waa wax xaq lagu caabudo majiro Alle mooyee.

"لا إلـــه": waxay reebaysaa oo ay diidaysaa wax kasta oo dhan oo Alle sokadiisa la caabudo.

"إلا الله": waxay cibaadada u sugaysaa Alle oo kali ah, cibaadadiisa qof la wadaago ma jiro sida uusan u jirin qof la wadaago mulkigiisa, tafsiirka caddaynayana waa hadalka Alle:

﴿ وَإِذۡ قَالَ إِبۡرَٰهِيمُ لِأَبِيهِ وَقَوۡمِهِۦٓ إِنَّنِي بَرَآءٞ مِّمَّا تَعۡبُدُونَ ٢٦ إِلَّا ٱلَّذِي فَطَرَنِي فَإِنَّهُۥ سَيَهۡدِينِ ٢٧ وَجَعَلَهَا كَلِمَةَۢ بَاقِيَةٗ فِي عَقِبِهِۦ لَعَلَّهُمۡ يَرۡجِعُونَ ٢٨ ﴾ [سورة الزخرف]

oo uu macnihiisu yahay: {wakhti xusa uu nabi Ibraahiim ku yiri Aabbihiis iyo dadkiisa aniga bari baan ka ahay waxaad caabudaysaan, Allihii i abuuray mooyee wuuna i hanuuninayaa, wuxuuna ka dhigay kalimadii mid baaqi ku ah faraca Ibraahiim si ay xaqa ugu noqdaan} iyo hadalka Alle:

﴿ قُلۡ يَٰٓأَهۡلَ ٱلۡكِتَٰبِ تَعَالَوۡاْ إِلَىٰ كَلِمَةٖ سَوَآءِۭ بَيۡنَنَا وَبَيۡنَكُمۡ أَلَّا نَعۡبُدَ إِلَّا ٱللَّهَ وَلَا نُشۡرِكَ بِهِۦ شَيۡـٔٗا وَلَا يَتَّخِذَ بَعۡضُنَا بَعۡضًا أَرۡبَابٗا مِّن دُونِ ٱللَّهِۚ فَإِن تَوَلَّوۡاْ فَقُولُواْ ٱشۡهَدُواْ بِأَنَّا مُسۡلِمُونَ ٦٤ ﴾ [سورة آل عمران]

oo uu macnihiisu yahay: {waxaad ku tiraahdaa kuwa kitaabka rumeeyay u imaada kalimad noo siman annaga iyo adinka oo ah in aannan caabudin Alle mooyee, aananna waxba la wadaajin, uusanna ka yeelan qaarkeen qaarka kale kuwo la caabudo Alle sokadiis, haddii ay

jeestaan waxaad dhahdaan marqaati ka noqda in aan muslimiin nahay}. Rumaynta Maxamed ﷺ inuu Rasuul Alle yahay waxaa daliil u ah hadalka alle:

﴿ لَقَدْ جَآءَكُمْ رَسُولٌ مِّنْ أَنفُسِكُمْ عَزِيزٌ عَلَيْهِ مَا عَنِتُّمْ حَرِيصٌ عَلَيْكُم بِٱلْمُؤْمِنِينَ رَءُوفٌ رَّحِيمٌ ﴿١٢٨﴾ ﴾

[سورة التوبة]

oo uu macnihiisu yahay: {waxaa idiin yimid Rasuul idinka mid ah oo uu ku culus yahay waxa idin dhibaya kheyrkana idinkula dadaalaya una turis iyo naxariis badan muuminiinta}, macnaha rumaynta in Maxamed ﷺ rasuulkii Alle yahay waa in la yeelo oo la adeeco wuxuu faro, lana rumeeyo wuxuu sheego, lagana fogaado wuxuu reebay, iyo in aan Alle lagu caabudin wixii uu noo sharciyeeyay mooyee wax kale.

Salaadda iyo Zakada iyo macnaha Tooxiidka waxaa daliil u ah hadalka Alle:

﴿ وَمَآ أُمِرُوٓاْ إِلَّا لِيَعْبُدُواْ ٱللَّهَ مُخْلِصِينَ لَهُ ٱلدِّينَ حُنَفَآءَ وَيُقِيمُواْ ٱلصَّلَوٰةَ وَيُؤْتُواْ ٱلزَّكَوٰةَ ۚ وَذَٰلِكَ دِينُ ٱلْقَيِّمَةِ ﴿٥﴾ ﴾ [سورة البينة]

oo uu macnihiisu yahay: {lama farin in ay Alle kali ah caabudaan mooyee iyagoo diinta u saafi yeelaya una iilanaya "rumaynta Rususha oo dhan", salaaddana oogaan zakadana bixiyaan sidaas waa diinta toosan}.
Soonkiina waxaa u daliil ah hadalka Alle:

﴿ يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ كُتِبَ عَلَيۡكُمُ ٱلصِّيَامُ كَمَا كُتِبَ عَلَى ٱلَّذِينَ مِن قَبۡلِكُمۡ لَعَلَّكُمۡ تَتَّقُونَ ١٨٣ ﴾ [سورة البقرة]

oo uu macnihiisu yahay: {kuwa Alle rumeeyow waxaa korkiinna lagu waajib yeelay soonka sida loogu waajib yeelay kuwii idinka horreeyay, waxaad mudan tihiin inaad cabsataan}.
Xajkana waxaa daliil u ah hadalka Alle :

﴿ وَلِلَّهِ عَلَى ٱلنَّاسِ حِجُّ ٱلۡبَيۡتِ مَنِ ٱسۡتَطَاعَ إِلَيۡهِ سَبِيلٗاۚ وَمَن كَفَرَ فَإِنَّ ٱللَّهَ غَنِيٌّ عَنِ ٱلۡعَٰلَمِينَ ٩٧ ﴾ [سورة آل عمران]

oo uu macnihiisu yahay: {Alle wuxuu dadka ku leeyahay inay Xajka aadaan qofkii awooda, qofkii diida Alle makhluuqaadka oo dhan wuu ka deeqtoon yahay}.

***<u>Darajada labaad</u>: Iimaanka:***

waa dhowr iyo todobaatan qeybood, midda ugu sarreysa waa kalimada towxiidka “ku xaq lagu caabudo ma jiro Alle mooyee”, midda ugu hooseysana waa jidka oo dhibka laga qaado, xishoodkana waa qeyb ka mid ah Iimaanka.

***Tiirarka Iimaanka*.**

Tiirarka Iimaankuna waa lix: waa inaad Alle rumeyso, iyo Malaa’iktiisa, kutubtiisa, rusushiisa, maalinta Qiyaamaha iyo qadarka khayrkiisa iyo shartiisa, waxaana daliil u ah hadalka Alle:

﴿ لَّيْسَ ٱلْبِرَّ أَن تُوَلُّوا۟ وُجُوهَكُمْ قِبَلَ ٱلْمَشْرِقِ وَٱلْمَغْرِبِ وَلَٰكِنَّ ٱلْبِرَّ مَنْ ءَامَنَ بِٱللَّهِ وَٱلْيَوْمِ ٱلْءَاخِرِ وَٱلْمَلَٰٓئِكَةِ وَٱلْكِتَٰبِ وَٱلنَّبِيِّۦنَ ﴾ [سورة البقرة ١٧٧]

oo uu macnihiisu yahay: {Samafalku ma ah in aad wajiyadiinna u jeedisaan dhinac qorrax ka soo baxa iyo qorrax u dhaca, laakiin samafalku waa qofkii rumeeya Alle iyo maalinta Qiyaamaha iyo Malaa’ikta iyo kitaabka iyo nabiyada}, Qadarka waxaa daliil u ah hadalka Alle:

﴿ إِنَّا كُلَّ شَيۡءٍ خَلَقۡنَٰهُ بِقَدَرٍ ٤٩ ﴾ [سورة القمر]

oo uu macnihiisu yahay: {wax kasta waxaan ku abuurnay qadar}.

***Darajada Saddexaad: Ixsaanka.***

Ixsaanku waa hal rukni, waana in aad Alle u caabuddo sidi adigoo arkaya, haddii aadan arkaynin asaga ayaa ku arkaya, waxaana daliil u ah hadalka Alle:

﴿ إِنَّ ٱللَّهَ مَعَ ٱلَّذِينَ ٱتَّقَواْ وَّٱلَّذِينَ هُم مُّحۡسِنُونَ ١٢٨ ﴾ [سورة النحل]

oo uu macnihiisu yahay: {Alle wuxuu la jiraa kuwa ka cabsada iyo kuwa ixsaanka sameeya} iyo hadalka Alle:

﴿ وَتَوَكَّلۡ عَلَى ٱلۡعَزِيزِ ٱلرَّحِيمِ ٢١٧ ٱلَّذِي يَرَىٰكَ حِينَ تَقُومُ ٢١٨ وَتَقَلُّبَكَ فِي ٱلسَّٰجِدِينَ ٢١٩ إِنَّهُۥ هُوَ ٱلسَّمِيعُ ٱلۡعَلِيمُ ٢٢٠ ﴾

[سورة الشعراء]

oo uu macnihiisu yahay: {talo saaro Allihii adkaada ee naxariista badan, Allihii ku arkaaya markii aad salaadda u istaagayso "oo aad kaligaa tukanayso" "arkaayana" gadgadoonkaaga aad dadka la tukanayso, Alle

waa Alle maqal badan oo cilmi badan}, iyo hadalka Alle:

﴿ وَمَا تَكُونُ فِي شَأْنٍ وَمَا تَتْلُواْ مِنْهُ مِن قُرْءَانٍ وَلَا تَعْمَلُونَ مِنْ عَمَلٍ إِلَّا كُنَّا عَلَيْكُمْ شُهُودًا إِذْ تُفِيضُونَ فِيهِ ﴾ [سورة يونس ٦١]

oo uu macnihiisu yahay: {arrin muhiim ah kuma jirtid, qur’aankana quraan kama akhrisid, camalna ma samaysaan illaa waxaan nahay kuwo idin og markii aad si niyad ah u gudagalaysaan} sunnada xaggeedana waxaa daliil u ah xadiiska Jibriil ee aadka loo yaqaan

عن عمر بن الخطاب رضي الله عنه قال: ( بينما نحن جلوس عند النبيّ ﷺ إذ طلع علينا رجل شديد بياض الثياب شديد سواد الشعر، لا يرى عليه أثر السفر ولا يعرفه منا أحد، فجلس إلى النبيّ ﷺ فأسند ركبتيه إلى ركبتيه، ووضع كفّيه على فخذيه وقال: يا محمّد أخبرني عن الإسلام، فقال: أن تشهد أن لا إله إلا الله وأن محمّداً رسول الله، وتقيم الصلاة وتؤتي الزكاة وتصوم رمضان وتحجّ البيت إن استطعت إليه سبيلاً، قال: صدقت. فعجبنا له يسأله ويصدّقه. قال: أخبرني عن الإيمان، قال: أن تؤمن بالله وملائكته وكتبه ورسله واليوم الآخر وبالقدر خيره وشرّه، قال: أخبرني عن الإحسان. قال: أن تعبد الله كأنك تراه، فإن لم تكن تراه فإنه يراك. قال: أخبرني

عن الساعة، قال: ما المسؤول عنها بأعلم من السائل. قال: أخبرني عن أماراها. قال: أن تلد الأمة ربّتها، وأن ترى الحفاة العراة العالة رِعاءَ الشَّاءِ يتطاولون في البنيان. قال: فمضى. فلبثنا ملياً فقال: يـــا عمر أتدرون من السائل؟ قلنا: الله ورسوله أعلم. قال: هذا جبريل أتاكم يعلمكم أمر دينكم )

oo uu macnihiisu yahay: (wakhti aan fadhinno Nabiga ﷺ agtiisa ayaa waxaa nagu soo baxay nin ay caddaanta dharkiisu daran tahay, madowga timihiisuna uu aad u daran yahay, oo aan safarka raadkiisu ka muuqan, uusanna aqoonnin qof annaga naga mid ah, Nabiga ﷺ ayuu u soo fadhiistay wuxuuna cuskiyay labdadiisa jilbood rasuulka jilbihiisa, wuxuuna saaray labadiisa calaacalood rasuulka labadiisa cajir, wuxuu yiri: Maxamadow iiga warran Islaamka wuxuu yiri Nabigu ﷺ: waa in aad qirto inuusan jirin ku xaq lagu caabudo Alle maahee, Maxamedna ﷺ uu rasuulka Alle yahay, salaadda aad tukato "toosiso" Zakada aad bixiso, bisha ramadaanna aad soonto, xajka aad aaddo haddii aad awooddo, wuxuu yiri: run baad sheegtay, waan la yaabnay waxbuu waydiinayaa haddana wuu rumeynayaa, wuxuu waydiiyay iiga warran

Iimaanka, Nabiga ﷺ wuxuu yiri: waa in aad Alle rumeysaa, sidoo kale Malaa'iktiisa, kutubtiisa, rusushiisa, maalinta qiyaamaha, iyo qadarka kheyrkiisa iyo shartiisa, wuxuu yiri iiga warran Ixsaanka Nabiga ﷺ wuxuu yiri: in aad Alle u caabuddo sidi adigoo arkaya, haddii aadan arkaynin asaga ayaa ku arkaya, wuxuu yiri iiga warran saacadda, Nabiga ﷺ wuxuu yiri: qofka wax la waydiinayo saacadda kama oga qofka waydiinaya, wuxuu yiri iiga warran waxyaabaha lagu garto, Nabiga ﷺ wuxuu yiri: waa inay dhasho addoontu sayidkeeda iyo in aad aragto kuwii cagaha caddaa ee qaawanaa ee saboolka ahaa ee ari raaca ahaa oo saraha dhaardheer iskugu faanaya, Cumar wuxuu yiri ninkii wuu tagay, markii aan wax yar joognay ayaa
Nabiga ﷺ wuxuu yiri: Cumarow ma taqaannaan midkii wax waydiinayay? Waxaan dhahnay Alle iyo Rasuulkiisa ayaa yaqaan, Nabiga wuxuu yiri: wuxuu ahaa Jibriil oo idinkugu yimid in uu diintiinna idin baro).

## *ASALKA SADDEXAAD*

Waa barashada Nabigeenna Maxamed ah ﷺ , magaciisana waa Maxamed bin Cabdullaahi bin

Cabdimudhalib bin Haashim, Haashimna ka ahaa Qureysh, Qureyshna Carab, Carabna ka ahaa owlaaddii Ismaaciil bin Ibraahiim Khaliil nabadgelyo iyo naxariis asaga iyo nabigeenna korkooda ha ahaato, da'diisana waxay ahayd lixdan iyo saddex sano, oo ay afartan sano ahayd nabinnimada ka hor, saddex iyo labaatan sanana uu ahaa Nabi iyo Rasuul, waxaa nabi looga dhigay suuradda Iqra', waxaana rasuul looga dhigay suuradda Muddathir, magaaladiisu waa Makka. Waxa uu Alle u soo diray inuu shirkiga ka digo Towxiidkana ugu yeero, waxaa daliil u ah hadalka Alle:

﴿ يَـٰٓأَيُّهَا ٱلۡمُدَّثِّرُ ۝١ قُمۡ فَأَنذِرۡ ۝٢ وَرَبَّكَ فَكَبِّرۡ ۝٣ وَثِيَابَكَ فَطَهِّرۡ ۝٤ وَٱلرُّجۡزَ فَٱهۡجُرۡ ۝٥ وَلَا تَمۡنُن تَسۡتَكۡثِرُ ۝٦ وَلِرَبِّكَ فَٱصۡبِرۡ ۝٧ ﴾ [سورة المدثر]

oo uu macnihiisu yahay: {midkaan isdadaboolayow, istaag oo dig, rabbigaana waynee, dharkaagana daahiri, xumaantana ka fogow, hana ku mannaysan adigoo badsanaya, Allahaaga dartiisana u sabar}. Macnaha "قم فأنذر" wuxuu ka digayaa shirkiga wuxuu u yeerayaa

towxiidka , "وربــــك فكـــبر" kuwaynee towxiidka "وثيابك فطهر", ka daahiri camalyaalkaaga shirkiga, "والرجــــز فــــاهجر", Rijsigu waa sanamyada, ka fogaanshadeeduna waa in laga tago sanamyada, ahalkooda, lagana bari noqdo ayada iyo ahalkeedaba. Wuxuu nabiga ﷺ intaas dadka ugu yeerayay toban sano, toban sano kadibna waxaa loo qaaday cirka, waxaana lagu soo waajibiyay salaadaha shanta ah, wuxuu Makka ku tukaday saddex sano, kadib waxaa la amray inuu u haajiro Madiina, Hijraduna waa tagid laga tago waddan gaalo lana aado waddan Muslim ah, hijraduna waajib ayay ku tahay ummaddan in ay ka tagaan waddan gaalo aadaanna waddan muslim, waana jirtaa ilaa qiyaamuhu ka dhaco, waxaa daliil u ah hadalka Alle:

﴿ إِنَّ ٱلَّذِينَ تَوَفَّىٰهُمُ ٱلْمَلَٰٓئِكَةُ ظَالِمِىٓ أَنفُسِهِمْ قَالُوا۟ فِيمَ كُنتُمْ ۖ
قَالُوا۟ كُنَّا مُسْتَضْعَفِينَ فِى ٱلْأَرْضِ ۚ قَالُوٓا۟ أَلَمْ تَكُنْ أَرْضُ ٱللَّهِ وَٰسِعَةً
فَتُهَاجِرُوا۟ فِيهَا ۚ فَأُو۟لَٰٓئِكَ مَأْوَىٰهُمْ جَهَنَّمُ ۖ وَسَآءَتْ مَصِيرًا ﴿٩٧﴾ إِلَّا
ٱلْمُسْتَضْعَفِينَ مِنَ ٱلرِّجَالِ وَٱلنِّسَآءِ وَٱلْوِلْدَٰنِ لَا يَسْتَطِيعُونَ حِيلَةً

وَلَا يَهۡتَدُونَ سَبِيلٗا ٩٨ فَأُوْلَٰٓئِكَ عَسَى ٱللَّهُ أَن يَعۡفُوَ عَنۡهُمۡۚ وَكَانَ ٱللَّهُ عَفُوًّا غَفُورٗا ٩٩ ﴾ [سورة النساء ٩٧-٩٩]

oo uu macnihiisu yahay: {kuway oofsatay malaa'ikta ayagoo naftooda dulmiyay, waxay dhahaan maxaad ahaydeen waxay dhahaan waxaan ahayn kuwo lagu daciifsaday dhulka, waxay malaa'iktu ku dhahaan ma wuusan ahaan dhulka Alle mid waasac ah oo aad dhexdiisa ku haajirtaan, kuwaas hoygooda waa jahannama, waxaa xumaaday aayahooda, intaan ka ahayn kuwii la daciifsaday ee ragga iyo dumarka iyo caruurta ah, ee aan awoodin xiilad kuna toosi karin jidka, kuwaas wuxuu u dhaw yahay Alle inuu iska cafiyo xaggooda, Allana waa saamaxe dambiga dhaafa} iyo hadalka Alle:

﴿ يَٰعِبَادِيَ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓاْ إِنَّ أَرۡضِي وَٰسِعَةٞ فَإِيَّٰيَ فَٱعۡبُدُونِ ٥٦ ﴾

[سورة العنكبوت]

oo uu macnihiisu yahay: {addoomadayda i rumeeyayoow dhulkayga waa waasic ee aniga uun igu caabuda}. Baqawi wuxuu yiri Alle ha u naxariistee, aayaddaan waxay ku soo dagtay muslimiintii Makka joogay oo aan haajirin, Alle wuxuu ugu yeeray magaca iimaanka, hijrada

waxaa daliil u ah xagga sunnada xadiiska nabiga ﷺ:

( لا تنقطع الهجرة حتى تنقطع التوبة، ولا تنقطع التوبة حتى تطلـــع الشمس من مغربها)

"hijradu ma go'eyso ilaa toobakeenku go'o, toobadkeenkuna ma go'o ilaa ay qorraxdu ka soo baxdo qorrax u dhaca", markii uu nabiga ﷺ ku nagaaday madiina waxaa la amray sharciyada islaamka wixii ka dhimmanaa sida Zakada, Soonka, Xajka, Aadaanka, Jihaadka, Isfaridda wanaagga iyo iska reebidda xumaanta iyo wixii kale ee sharciyada islaamka, toban sano ayayna ku qaadatay arrimahaas. Nabiga ﷺ wuu dhintay, diintiisuna waa mid baaqi ah oo hartay, diinkiisuna waa kan: ma jiro kheyr uusan ummadda tusin, mana jirto shar uusan ummadda uga digin, kheyrkii uu ummadda tusay waa: towxiid iyo wax kasta uu Alle jecel yahay raallina ka yahay, shartii uu ka digayna waa: shirkiga iyo wax kasta uu Alle karhayo reebaayana.

Alle wuxuu u soo diray Nabiga ﷺ dadkoo dhan, wuxuuna ku waajibiyay daacadiisa jinniga iyo insiga inay isaga adeecaan, waxaana daliil u ah hadalka Alle:

﴿ قُلۡ يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ إِنِّي رَسُولُ ٱللَّهِ إِلَيۡكُمۡ جَمِيعًا ﴾ [سورة الأعراف ١٥٨]

oo uu macnihiisu yahay {waxaad tiraahdaa dadoow waxaan ahay rasuul Alle oo loo soo diray adinka dhammaantiin}, diintii ayuu Alle ku kaamil yeelay, waxaana daliil u ah hadalka Alle:

﴿ ... ٱلۡيَوۡمَ أَكۡمَلۡتُ لَكُمۡ دِينَكُمۡ وَأَتۡمَمۡتُ عَلَيۡكُمۡ نِعۡمَتِي وَرَضِيتُ لَكُمُ ٱلۡإِسۡلَٰمَ دِينٗاۚ ﴾ [سورة المائدة ٣]

oo uu macnihiisu yahay: {maanta ayaan diintiinna idiin dhammaystiray, nicmadaydana korkiinna ku taam yeelay, waxaanna idinkaga raalli noqday Islaamka diin ahaan}, waxaa daliil u ah dhimashada Nabiga ﷺ hadalka Alle:

﴿ إِنَّكَ مَيِّتٞ وَإِنَّهُم مَّيِّتُونَ ٣٠ ثُمَّ إِنَّكُمۡ يَوۡمَ ٱلۡقِيَٰمَةِ عِندَ رَبِّكُمۡ تَخۡتَصِمُونَ ٣١ ﴾ [سورة الزمر]

oo uu macnihiisu yahay: {adigu waad dhimanaysaa, ayaguna way dhimanayaan, kadibna adinka maalinta qiyaamaha Alle hortiisa ayaad ku doodi doontaan}.

Dadka markay dhintaan waa la soo bixinayaa, waxaa daliil u ah hadalka Alle:

﴿ مِنْهَا خَلَقْنَٰكُمْ وَفِيهَا نُعِيدُكُمْ وَمِنْهَا نُخْرِجُكُمْ تَارَةً أُخْرَىٰ ﴿٥٥﴾ ﴾ [سورة طه]

oo uu macnihiisu yahay: {ayada "dhulka" ayaan idinka abuurnay, ayada ayaana la idinku celinayaa "aasayaa markaad dhimataan" ayada ayaan idinka soo bixinaynaa "soo saarista maalinta qiyaamaha" mar kale}, iyo hadalka Alle:

﴿ وَٱللَّهُ أَنۢبَتَكُم مِّنَ ٱلْأَرْضِ نَبَاتًا ﴿١٧﴾ ثُمَّ يُعِيدُكُمْ فِيهَا وَيُخْرِجُكُمْ إِخْرَاجًا ﴿١٨﴾ ﴾ [سورة نوح]

oo uu macnihiisu yahay {Alle dhulka xaggiisa ayuu idinka soo saaray haddana idinku celin doonaa "dhulka" idinkana soo saari doonaa}, isa soo bixinta kadib camalyaalkii ayaa la xisaabin doonaa lana iska abaalmarin doonaa, waxaa daliil u ah hadalka Alle:

﴿ وَلِلَّهِ مَا فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَمَا فِى ٱلْأَرْضِ لِيَجْزِىَ ٱلَّذِينَ أَسَٰٓـُٔوا۟ بِمَا عَمِلُوا۟ وَيَجْزِىَ ٱلَّذِينَ أَحْسَنُوا۟ بِٱلْحُسْنَى ﴿٣١﴾ ﴾

[سورة النجم]

oo uu macnihiisu yahay: { Alle waxaa u sugnaaday wax kasta oo cirarka iyo dhulalka dhexdooda ku jira si uu uga abaalmariyo kuwii xumaanta sameeyay camalkooda, uguna abaalmariyo kuwii wanaagga sameeyay wanaag}, qofkii beeniya isa soosaaridda wuu gaaloobay, waxaana daliil u ah hadalka Alle:

﴿ زَعَمَ ٱلَّذِينَ كَفَرُوٓاْ أَن لَّن يُبۡعَثُواْۚ قُلۡ بَلَىٰ وَرَبِّي لَتُبۡعَثُنَّ ثُمَّ لَتُنَبَّؤُنَّ بِمَا عَمِلۡتُمۡۚ وَذَٰلِكَ عَلَى ٱللَّهِ يَسِيرٞ ٧ ﴾ [سورة التغابن]

oo uu macnihiisu yahay {waxay sheegteen kuwii gaaloobay in aan la soo bixin doonin, waxaa tiraahdaa sidaas maaha ee Alle ayaan ku dhaartay waa la idin soo bixin doonaa, kadibna la idiin sheegi doonaa waxaad samayseen, kaasina Alle waa u fudud yahay}, Alle wuxuu u soo diray rususha oo dhan inay digaan ooy bishaareeyaan  waxaa daliil u ah hadalka Alle:

﴿ رُّسُلٗا مُّبَشِّرِينَ وَمُنذِرِينَ لِئَلَّا يَكُونَ لِلنَّاسِ عَلَى ٱللَّهِ حُجَّةُۢ بَعۡدَ ٱلرُّسُلِۚ ١٦٥ ﴾ [سورة النساء ١٦٥]

oo macnihiisu yahay: {waxaan soo dirnay rasuullo bishaareynaya digaayana si aysan dadka xujo ugu yeelan Alle korkiisa rususha kadib}, kooda ugu horreeyay waa Nuux ﷺ

kooda ugu dambeeyayna waa Maxamed ﷺ, waana kii lagu soo qatimay nabiyada, waxaa daliil u ah in uu Nuux yahay nabigii ugu horreeyay hadalka Alle:

﴿ إِنَّآ أَوۡحَيۡنَآ إِلَيۡكَ كَمَآ أَوۡحَيۡنَآ إِلَىٰ نُوحٖ وَٱلنَّبِيِّـۧنَ مِنۢ بَعۡدِهِۦۚ ﴾

[سورة النساء ١٦٣]

oo uu macnihiisu yahay: {annaga ayaa kuu waxyoonnay sida aan ugu waxyoonnay Nuux iyo nabiyaddii ka dambeeyay}.

Ummad kasta Alle wuxuu u soo diray rasuul laga billaabo Nuux ilaa laga gaaro Maxamed waxayna amrayeen cibaadada Alle oo kali ah, waxayna ka reebayeen cibaadada Alle wixii ka soo hara "dhaaquut", waxaana daliil u ah hadalka Alle:

﴿ وَلَقَدۡ بَعَثۡنَا فِي كُلِّ أُمَّةٖ رَّسُولًا أَنِ ٱعۡبُدُواْ ٱللَّهَ وَٱجۡتَنِبُواْ ٱلطَّٰغُوتَۖ ﴾ [سورة النحل ٣٦]

oo macnihiisu yahay: {waxaa xaqiiqo ah in aan u soo dirnay Ummad kasta rasuul inay caabudaan Alle kana dheeraadaan Dhaaqutka}, Alle wuxuu ku waajibiyay dhammaan addoomada inay ku kufriyaan Dhaaquut Allana rumeeyaan.

Ibnu qayim Alle ha u naxariisto wuxuu yiri: Macnaha Dhaaquutka waa wixii addoonka xadka kaga gudbo oo ah wax la caabudo ama la raaco ama la adeeco, Dhaaquutyaalkana way badan yihiin madaxdooduna waa shan:

1. Ibliis Alle ha lacnadee
2. iyo Qofkii la caabudo raallina ka noqda
3. iyo Qofkii ugu yeeray dadka inay asaga caabudaan
4. iyo Qofkii sheegtay inuu og yahay cilmi qaybka
5. iyo Qofkii wax ku xukuma xukunka Alle waxaan ahayn.

Waxaana daliil u ah hadalka Alle:

﴿ لَآ إِكۡرَاهَ فِي ٱلدِّينِۖ قَد تَّبَيَّنَ ٱلرُّشۡدُ مِنَ ٱلۡغَيِّۚ فَمَن يَكۡفُرۡ بِٱلطَّٰغُوتِ وَيُؤۡمِنۢ بِٱللَّهِ فَقَدِ ٱسۡتَمۡسَكَ بِٱلۡعُرۡوَةِ ٱلۡوُثۡقَىٰ لَا ٱنفِصَامَ لَهَاۗ وَٱللَّهُ سَمِيعٌ عَلِيمٌ ٢٥٦ ﴾ [سورة البقرة]

oo uu macnihiisu yahay: {diinka la iskuma qasbo, hanuunkii wuxuu ka cadaaday baadida, qofkii ku gaalooba dhaaquutka, Allana rumeeya, waxaa xaqiiqo ah in uu qabsaday xarig "islaamka" adag oo aan go’aynin, Allana waa kii maqal badan oo cilmi badan}, kanna waa

macnaha kalimada towxiidka "لا إلــــــه إلا الله"
Xadiisna waxaa ku jiray:

(رأس الأمر الإسلام ، وعموده الصلاة ، وذروة سنامه الجهـــاد في سبيل الله).

oo macnihiisu yahay “amarka madaxiisu waa Islaamka, tiirkiisana waa Salaadda, meesha ugu sarreysana waa Jihaadka jidka Alle} Alle ayaa ogaal badan.

*Waxaa intaas ku dhammaaday tarjumidda kitaabka Usuulu athalaathah.*

***وصلى الله على نبينا محمحد وعلى آله وصحبه أجمعين.***

***Waxaa tarjumay:***
***Cabdifataax Axmed Yare.***